**Ku dhammaan waalidiinta**

Mashruuca luuqad xoojinta 1-6(Språksterk 1-6) waa mashruuc cilmibaaris oo ay waddo Jaamacadda Oslo kaas oo daraasad ku samaynayaa sida xannaanooyinka ku yaal xaafadaha ajaanibku ku badan yahay ay carruuraha uga caawin lahaayeen in ay luuqadda si fiicn u bartaan ka hor inta aanay iskuulka bilaabin.
Mashruuca waxaa maalgeliyay Golaha cilmibaarista Norway iyo Oslo kommune.

Waxaanu idiinla soo xiriirnay in aanu idin waydiino in ilmihiinnu uu ka qaybgalo mashruucan daraasadda cilmibaarista.

Bogagga soo socda ayaa xogta cilmibaarista aad loogu faahfaahiyay. Waa ognahay warbixinta halkan ku qorani ay aad u badan uu tahay, sida badanna ay ka fududdahay in qofku uu toos ah ula soo xiriiro cilmibaarayaasha daraasadda. Sidaa darteed nala soo xiriir haddii aad wax su´aalo ah qabto.

Dhammaan waalidiinta oggolaada in carruurahoodu ay ka qaybqaataan daraasadda, waa la siin doonaa natiijada ka soo baxda cilmibaarista.

Xaaladda covid-19 ka darteed waxaanu ka afeefanaynaa wixii isbeddel ku yimaadda jadwalka hawlsocodka daraasadda. Haddii wax isbeddeli dhacana waanu idinla socodsiin doonnaa.

Salaan naga guddooma


Veslemøy Rydland
Professor/prosjektleder
Institutt for pedagogikk
Universitetet i Oslo
veslemoy.rydland@iped.uio.no
Prosjekttelefon: 465 03 873

Ratib Lekhal
Førsteamanuensis/prosjektleder
Institutt for pedagogikk
Universitetet i Oslo
ratib.lekhal@iped.uio.no

# Mak a qaybgelaysaa mashruuca cilmibaarista luuqad xoojinta 1-6 (Språksterk 1-6)?

## Ujeeddo

Cilmibaarasyaasha Machadka waxbarashada iyo barbaarinta iyo xarunta cilmi Sayniska(Institutt for pedagogikk og Naturfagsenteret) ee Jaamacadda Oslo oo mashruucan luuqad xoojinta 1-6(Språksterk 1-6) hawshiisa wadaa waxay daraasaddan ugaga dan leeyihiin in ay ku ogaadaan sidii shaqaalaha xannaanooyinka iyo waalidiintu ay carruuraha aad ugaga caawin lahaayeen luuqad barashada. Mashruucan samayntiisa waxaa nagala qaybgalay madaxda xannaanooyinka shan xaafadood oo Oslo ka tirsan iyo hay´adda carruuraha waxbarashada ka caawisa Pedagogisk-Psykologisk Tjeneste (PPT).

Cilmibaaristan waxaanu macluumaad ka ururin doonnaa carruuraha iyo shaqaalaha xannaanooyinka ay daraasaddani khusayso. Natiijada iyo aqoonta cilmibaaristan ka soo baxda waxaa lagu samayn doonaa hab ama modeel dhammaystiran oo loogu magacdaro Språksterk-modell 1-6. modeelkaas oo noqon doona mid carruuraha luuqadda si fiican loogu baro, taas oo xannaanooyin badanina ay kasii faa´iidi doonaan. Kadib waxaa mashruuca loo gudbin doonaa xannaanooyinka daraasadda ka qaybgalay iyadoo wadashaqayn lagala yeelanayo hay´adda carruuraha waxbarashada ka caawisa ee PPT.

Mashruucan cilmibaarista laba weji ayuu u qaybsan yahay:

Wejiga 1aad xannaanooyinka laba kooxood ayaa loo qaybin doonaa iyadoon loo kala fiirsan: Koox A iyo koox B. Kooxuhu waxay muddo laba sano oo ka bilaabata xilliga dayrta 2021 illaa xilliga guga 2023 ay soo tijaabin doonaan laba modeel oo kala duwan, modeeladu shaqaalaha ayay caawinayaan

Koox A: Shaqaalaha xannaanooyinka kooxdan ku jira waxay qaadan doonaan dhowr koorso, waxaana loo kuurgeli doonaa habka ay shaqaaluhu u caawiyaan carruuraha qaybaha xannaanooyinka. Ka dib ayaa layaa hay´adda PPT du shaqaalaha ku soo warcelin doontaa in habka ay carruuraha u caawiyaan ay fiican tahay iyo in ay jiraan meelo wax ka beddel u baahan.

Koox B: Shaqaalaha xannaanooyinka kooxdani iyana waxay samaynayaan dhammaan waxyaabaha ay koox B samaynayso. Waxaase intaa iyaga u dheer in shaqaalahu carruuraha ku tijaabin doonaan waxyaalo kale sida cayaaro iyo wada sheekaysi buugaag ku salaysan iyagoo la kaashanaya la taliyayaasha ka socda Hay´adda PPT da iyo xarunta culuunta sayniska.

Wejiga labaad ee cilmibaaristan waxaa dhammaan xannaanooyinka ka ku jira Koox A iyo Koox B ba la siin doonaa hab ama modeel dhamaytiran oo ay ku shaqeeyaan, modeelkaas oo loogu talagalay in shaqaaluhu caawimo ka helaan, wadashaqaynta waalidkana wax wayn ka taraya. Wejigani wuxuu soconayaa muddo sannad ah oo ka bilaabata xilliga dayrta 2023 illaa guga 2024.

Shaqaalaha xannaanada ayaa ku wargelin kara kooxda ay ku jiraan.

## Yaa ka mas´uula mashruucan cilmibaarista?

Machadka tacliinta iyo barbaarinta (Institutt for pedagogikk) ee Jaamacadda Oslo ayaa ka mas´uula mashruuca. Professor Veslemøy Rydland iyo professor Ratib Lekhal ayaa ka madaxa mashruucan cilmibaarisata.

**Maxaa laguu soo waydiiyay in aad ka qaybqaadato?**
mashruucu wuxuu qoray qiyaastii. 900 oo caruur ah qiyaastii 60 xanaanooyin kuwaas oo ka kala socda shan xaafadood oo Oslo ka tirsan. Xannaanada uu ilmahaagu tago oo daraasaddan oggolaatay in ay ka qayqaadato darteed ayaa adiga laguu soo wayddiiyay in aad ka qaybqaadataan mashruucan daraasadda cilmibaarista. sababtoo ah qaar badan oo ka mid ah caruurtii ku soo biirtay sannadkii hore ayaa ka tagay waaxda (oo u guuray waaxyo kale), waxaan rabnaa in aan caruur kale ah oo ka qayb qaadan kara qaybo ka mid ah mashruuca sanadkan iyo kindergartenka soo socda (høsten 2022 – vår 2024).

**Siday adiga kuu saamayn doontaa in aad ka qaybqaadataa?**
Haddii aad doorato in aad ka qaybqaadato daraasaddan,  Intaa waxaa dheer in aanu ilmahaaga xannaanda ku soo booqan doono. Hoos ayaanu ku sii faahfaahin doonnaa arrintan.
**Warbixintani waxay khusaysaa labada kooxood ba, Koox A iyo Koox B**
Macluumaadka ilmaha
3) Waxaan ka codsanaynaa maamulaha xanaanada inuu soo gudbiyo warbixin ku saabsan sida ilmuhu uga qaybqaato hawlaha kala duwan qiyaastii bishiiba mar laga bilaabo høsten 2021 ilaa våren 2024.

Kor kala socod marka uu ilmuhu xannaanda joogo iyo in lagu eego in uu sameeyo waxyaabo kala duwan
laba jeer oo kala duwan ayaanu ilmahaaga xannaanada ku soo booqan doonnaa (guga 2023 iyo guga 2024). Waxaan ku xidhan doona muddada uu ilmuhu xannaanada sii dhiganayo.

Xannaanda waxaanu:
1) Kor kala socon doonaa oo u kuurgeli doonnaa marka ilmuhu uu ku dhex jiro xaaladaha kala duwan ee maalin walba caadiyan xannaanada laga sameeyo, marka uu carruuraha kale ku dhex jiro ama uu la joogo shaqaalaha, tusaale ahaan marka uu cayaaraha ku jiro.
2) Ka duubi doonaa fiidyow soconaya (markiiba 5 – 10 daqiiqo), waxay noqon kartaa isagoo ilmahaaga qof wayn ay cayaaro wada samaynayaan ama buug loo akhriyayo isaga iyo carruuro kale. Carruuraha kuwa ugu yaryar waxaa dhici karta in su´aalaha loogu kala qaybiyo dhowr maalmood. Ilmaha waxaa la joogi kara qof shaqaalaha ka mida ama waalidka hadii loo bahdo.

**Qofku xor buu u yahay in uu ka qaybqaato**
Xor baad u tahay in aad daraasaddan ka qayqaadato, haddii aad doorato in aad ka qaybqaadato ogow markaad rabto waad ka bixi kartaa sabab la´aan. Macluumaadkaaga oo dhan markaa waa la tirtirayaa. Wax dhibaato ahina kaaga iman mayso haddii aad ka qaybqaadan waydo ama aad hadhow ka baxdo. Tusaale ahaan wax saamayn ah ku samayn mayso ilmahaaga iyo xannaanada haddii aad ka laabato ka qaybqaadashada daraasadda.

**Ilaalinta macluumaadkaaga - Sida macluumaadkaaga loo ilaalinayo iyo waxa loo isticmaali karo**
Waxa keliya oo aanu macluumaadkaaga iyo ka ilmahaaga u istcmaali karnaa ujeedda aanu qoraalkan ku xusnay. Sida uu dhigayo xeerka macluumaadka dadka waxaanu macluumaadkaaga u maamuli doonaa hab qarsoodi ah. Tan macnaheedu waa xeer iyo shuruudo adag ayaa ka yaal habka aanu u kaydino macluumaadka aanu soo ururino. Shaqaalaha ka shaqeeya daraasaddan cilmibaarista keliya ayaa arki kara macluumaadka, lama oggola in magacaaga ama ka ilmahaaga iyo macluumaadkiina kale meel lagu wada kaydiyo. Suuragal ma noqon karto in magaycada carruurta ama xannaanada laga garto haddi ay noqoto in natiijada ka soo baxda cilmibaaristan loo diro hay´adaha soo dalbada sida joornaalada iyo hay´adaha waxbarashada. Waxa iyana taa la mida haddii ay soo dalbadaan maqaalada daraasaadka cilmibaarista iyo dadka diyaariya digriiyada heerarka kala duwan ee jaamacadaha. Natiijada ka soo baxda cilmibaaristan waxay iftiimainaysaa sida uu horumarka iyo hab koritaanka ilmuhu uu ugu xidhan habka ay marba dadka isaga ku xeeran ay ula dhaqmaan/hayaan/xannaaneeyaan.

Cilmibaaristan macluumaadka la soo ururiyo waxaa ka mas´uula Machadka barbaarinta iyo waxbarashada(Institutt for pedagogikk) ee Jaamacadda Oslo..
Si aan cidina u arki karin macluumaadkaaga iyo ka ilmahaaga, waxaa si adag macluumaadkiina loogu kaydin doonaa sistamka kaydinta macluumaadka ee Jaamacadda UiO. Engage Lab og Tjenester for Sensitive Data (TSD) ee Jaamacadda UiO ayaa soo samaysay sistemka kaydinta macluumaadka ee ilaalinaya macluumaadka mashruucan cilmibaarista.

### Maxaa lagu samayn doonaa macluumaadkaaga marka daraasaddan cilmibaaristu dhammaato?

Marka mashruucan cilmibaaristu uu dhammaado macluumaadka dadka waxaa loo kaydinayaa hab aan lala xiriirsiin karin dadka ay macluumaadyadu khuseeyaan, sida qorshuhu yahay wuxuu mashruucu dhammaanayaa aakhirka 2027. Markaa waxaa la tirtiri doonaa macluumaadyada kuwa lala xiriirin karo warbixinaha kale ee dadka khuseeya. Wixii maqal iyo muuqaalba looga duubana waa la tirtiri doonaa. Waxaa dhici karta in daraasaad cilmibaaristan la xiriirta la sii wado marka uu ilmuhu iskuulka ku jiro. Hadday taasi ay dhacdo waxaa lagula soo xiriiri doonaa intaan mashruucu dhammaan si oggolaasho kale laguu waydiiyo.

### Xuquuqahaaga

Illaa inta inta ay suuragal tahay in la idinla xiriirin karo macluumaadka adiga ilmahaaga laga ururiyay, waxaad xaq u leedahay:

- in lagu tuso waxa macluumaad adiga iyo ilmahaaga laga ururiyay, koobina aad ka heli karto,
- in laguu saxo wixii khalad aad u aragto macluumaadkaaga ama ka ilmahaaga,
- in haddii aad codsato la tirtiro macluumaadkaaga ama ka ilmahaaga,
- in dacwo ku saabsan habka loo maamulay macluumaadkaaga shaqsi iyo ka ilmahaaga aad u gudbisan karto hay´adda ilaalada macluumaadka dadwaynaha ee Datatilsynet.

### Maxaa xaq noo siinaya in aanu maamulno macluumaadkaaga shaqsi?

Oggolaashaha aad bixiso keliya ayaa oggolaanaya in aanu maamuli karno macluumaadkaaga.

NSD-Xarunta cilmibaarista macluumaadka Norway (Norsk senter for forskningsdata) AS oo ka hawlgelaysa Machadka waxbarshada iyo barbaarinta ee Jaamacadda UiO (Institutt for pedagogikk), ayaa sugaysa in macluumaadka dadka ee cilmibaaristan la ururiyo loo maamulayo hab waafaqsan xeerarka ilaalinta macluumadka dadka(personvernregelverket).

### Wixii warbixin intan ka dheeraada xaggee aan ka helayaa?

Wixii aad daraasaddan su´aalo ka qabto, ama aad rabto in xuquuqahaaga aad ka faa´iidaysato, la xiriir:

- Veslemøy Rydland (veslemoy.rydland@iped.uio.no) eller Ratib Lekhal (ratib.lekhal@iped.uio.no) ved Institutt for pedagogikk ved UiO
- Ilaaliyaha macluumaadka dadwaynaha ee daraasadda qabilsan(Vårt pesonombud): Roger Markgraf-Bye (personvernombud@uio.no)

Haddii aad su´aal ka qabto qiyaasta sharci ee ay hay´adda NSD ku samaysay mashruucan, kala soo xiriir:

- NSD – Norsk senter for forskningsdata AS på epost (personverntjenester@nsd.no) ama telefoon: 55 58 21 17.

---

## Oggolaasho bixin

Waan helay oo waan fahmay warbixintan ku saabsan mashruuca cilmbaarista *Språksterk 1-6*, fursad aan su´aalo ku waydiiyana waa la i siiyay.

- ☐ • Waxaan aqbalay inaan ka qaybqaato mashruuca xooggan 1-6, in ilmahayga la arki karo xannaanada iyo inaan ka qaybqaato duubista codadka qaarkood kooxo yaryar. Waxaan sidoo kale aqbalay in macluumaadka khuseeya kaliya la isticmaali karo inta lagu jiro mashruucan.
- ☐ Waxaa kale oo aan oggolaaday in inta u dhexysa dayrta 2021 illaa guga 2024 uu madaxa xannaanadu bishii hal mar warbixin ka diyaariyo ilmahayga, warbixintaa oo ku saabsan marka uu ilmuhu ku dhex jiro waxyaalaha kala duwan ee xannaanada laga sameeyo. Waxaa kale oo aan oggolaaday in macluumaadka la isticmaali karo keliya inta mashruucu uu socdo.

------------------------------------------------------------------------------------------------------------

(Saxeexa ka qaybqaataha mashruuca, taariikh)

Magaca xannaanada oo xarfo waawayn ku qoran: ____________________________________________

Magaca qaybta oo xarfo waawayn ku qoran: ____________________________________________

Magaca waalidka oo xarfo waawayn ku qoran:

__________________________________________________________

Taariikhda dhalashada waalidka: ______________________________________

Telefoon lambarka waalidka:_______________________________________________

E-post-ta waalidka:_________________________________________________________

Magaca ilmaha oo xarfo waawayn ku qoran:

____________________________________________________________

Taariikhda dhalashada ilmaha: ______________________________

Jinsiga ilmaha: _____ wiil ____ gabadh

Faamiligu guriga ma isticmaalaa luuqad hooyo oo kale oo aan ahayn norwiiji? ____haa _____may

Hadday haa tahay, luuqaddee __________________________

Foomamka gacanta lagu soo buuxiyo waxaa la keenayaa xannaanada.